



**Jamhuuriyada Somaliland.**

**Golaha Wakiilada JSL.**



## **Warbixinta**

**Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 14<sup>aad</sup> ee  
Golaha Wakiilada JSL.**

**30/01/2011-10/04/2011**

## **Ku:- Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL.**

### **Ujeedo:- Warbixinta Shir-gudoonka eek al-fadhigii 14aad**

*Mudanayaal*

Si aad hawlaha qorshaynta kal-fadhiga 15aad ee golaha wakiilada u dardar galisaan una gudataan xilka la idiin soo igmaday, waxaan halka idiinku soo gudbinayaa waxqabadkii golaha wakiilada ee kal-fadhigii 14aad oo dhamaystiran si aad u xasuusataan..

Kal-fadhigan oo ahaa kal-fadhi mudadiisu dheerayd wax qabadka goluhuna aad u badnaa.

### **Kal-fadhigii 14aad**

No	Kal-fadhiga	Taariikhda uu furmay	Taariikhda uu xidhmay
1.	14aad	30/01/2011	10/04/2011

Kal-fadhigan oo ah kii ugu horeeyay ee Goluhu fariisto dhismaha casriga ah ee la dhisay (the new champer) waxaa ugu horayn uu ay mudanayaasha Goluhu ka doodeen ajendaha kal-fadhigan doodan oo socotay 2 maalmood ayna ka qayb qaateen 11 mudane ayay ka soo baxday Ajendihii kal-fadhigii 14aad oo la ansixiyay fadhigii 3aad ee 01/02/2011kii.

Kal-fadhigan oo 34 fadhi uu Goluhu fadhiistay mudo laba bilood iyo badh ah ayaa waxyaabihii Goluhu uu qabtay waxaa ka mid ahaa doodii iyo Ansixintii miisaaniyada Qaranka 2011ka, Xogwaraysiyo farabadan oo Goluhu la yeeshay Masuuliin Qaran oo Wasiiro u badan, Ansixintii Mashaariicda sharci ee Xukuumadu u soo gudbisay Golaha iyo Xeerarka Isgaadhsiinta, Biyaha iyo Sharciyada Hay'ada Abaabulka saarka, Sidoo kale oo Goluhu Meer mariyay intii lagu guda jiray Fadhigan Ansixinta Masuuliin Qaran.

#### **1. Warbixinadii Gudiyada Golaha**

Intaa ka dib waxaa Goluhu dhagaystay Warbixinadii Shirgudoonka iyo Gudiyada kala duwan ee Golaha Wakiilada oo sidan kala ahaa.

Taariikhda	Gudida	Fadhiga
05/02/2011	G/joogtada iyo Anshaxa	6aad
05/02/2011	G/ Deegaanka iyo khayraadka dabiiciga	6aad
06/02/2011	G/Arrimaha Bulshada iyo Diinta	7aad

06/02/2011	G/arrimaha Gudaha, difaaca iyo nabadgalyada	7aad
06/02/2011	G/ Siyaasada Arrimaha Dibada iyo iskaashiga caalamiga ah	7aad
06/02/2011	G/garsoorka, xuquuqan insaanka iyo dastuurka	7aad

## 1. Ansixintii Miisaaniyada Qaranka 2011ka.

Kal-fadhigan waxaa wasaarada Maaliyadu Golaha horkeenay Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2011ka, iyada warbixinka siiyaan Golaha Wasiirka iyo saraakiin kale oo ka tirsan Wasaarada Maaliyada.

## 2. Xeerarka Goluhu ka dooday iyo kuwii la Ansixiyay.

Taariikhda	Xeerka laga dooday/ansixiyay	Halka uu maray	Halka loo gudbiyay
05/02/2011	Waxa ka badalka Xeerka Kala Xadaynta mushaharooyinka <b>Q/kiisa 10<sup>aad</sup></b>	Ansixin	Madaxweynaha
20/02/2011	Xeerka Biyaha Qaranka	Ansixin	Madaxweynaha
08/02/2011	Xeerka Sharciyada NDRC	Ansixin	Guurtida
20/03/2011	&3 Adeega Madaarada	Ansixin	Madaxweynaha
27-28/03/2011	Wax ka-badalka iyo kaabista Xeerka G iyo degmooyinka	Celin	Madaxweynaha
04-10/04/2011	Xeerka Isgaadhsiinta	Ansixin	Guurtida

